ICRC

SOOMAALIYA

# XAQIIQOOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO - DISEMBAR 2021



## FUDUDEYNTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA



- **548,726** oo bukaan ah ayaa ka faa'iideystay barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga (PHC) ah oo ka dhacay **30** xarun caafimaad.
- **16,908** bukaan ayaa lagu daweeyay barnaamijka nafaqo ku daweynta bukaan socodka (OTP).
- **7,248** oo baaritaano ah ayaa ka dhacday Isbitaalka Guud ee Kismaayo, **3,652** isbitaalka Keysaneey, **9,769** isbitaalka Madiina iyo **9,566** qolalka xaaladaha deg-degga ah ee isbitaalka Baydhabo.
- **3,445** bukaan ayaa daryeel ka helay labada xarumood ee dajinta xaaladaha bukaannada ee Baydhabo iyo Kismaayo.
- **224** oo ah ka faa'iideystayaasha barnaamijka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa loo gudbiyay isbitaallo xaalad deg-deg aha awgeed ama si ay u helaan daryeel gaar ah iyada la bixiyay qarashka gaadiidka isbitaalka lagu geeyay.

## KA JAWAABIDDA CUDURKA SHUBAN BIYOODKA BA'AN EE DILLAACAY

- **13,626** kulamo kor loogu qaadayo caafimaadka ayaa la qabtay si loo helo xogta ka hor-tagga suban biyoodka. **146,917** qof ayaa ka qeyb galay kulamadan kor u qaadista caafimaadka.
- **1,465** oo ah xaaladaha shuban biyoodka ba'an ah ayaa la aqoonsaday iyada oo sidoo kalena la gudbiyay si loogu daweeyo xarumaha caafimaadka kala duwan ee Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed eek u yaala meelaha uu xanuunku saameeyay.

## BARNAAMIJKA DHAQAN CELINTA JIRKA

- **7,170** qof ayaa loo sameeyay adeegyada dhaqan celinta jirka.
- Magaalada Mugadisho; **302** oo ah qeybaha jirka oo aartifishal ah, **819** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **573** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **64** kuraasta dadka naafada ah iyo qalabka fadhiga ama istaagga lagu saxo ah ayaa la gaarsiiy. **8,325** oo ah kulamo fiiso-tarabiyo ah ayaa la qabtay.

- Hargeysa; **134** oo ah qeybaha jirka oo aartifishal ah, **197** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya, **163** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **44** kuraasta dadka naafada ah iyo qalabka fadhiga ama istaagga lagu saxo ah ayaa la gaarsiiy. **3,982** oo ah kulamo fiiso-tarabiyo ah ayaa la qabtay.
- Gaalkacyo; **54** oo ah qeybaha jirka oo aartifishal ah, **393** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya, **468** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **88** kuraasta dadka naafada ah iyo qalabka fadhiga ama istaagga lagu saxo ah ayaa la gaarsiiy. **5,376** oo ah kulamo fiiso-tarabiyo ah ayaa la qabtay.

## BARNAAMIJKA GARGAARKA DEG-DEGGA AH

- In ka badan **315** bukaano qaba dhaawacyo xabadeed ayaa la daweeyay arintan ayaa ka mid ah Adeegyada Gargaarka Deg-degga ah.
- **975** ka qeybgaleyaal ah ayaa qaatay koorsada tababarka gargaarka deg-degga ah ee bulshada (CFAT) oo lagu qabtay Laascaanood, Burco, Boorama, Berbera, Hargeysa iyo Ceerigaabo.
- Isugeyn **4,281** ka qeybgaleyaal ah oo ay ku jiraan kooxo mutadawiciin ah ayaa qaatatay koorsooyinka Gargaarka deg-degga ah iyo Daryeelka deg-degga ah ee Isbitaalka ka hor (PHEC) sida tababarka caadiga ah ee gargaarka deg-degga ah iyo tababarka gargaarka deg-degga ah ee Bulshada (CFAT).

### KA JAWAABIDDA COVID-19

- **288,141** oo kulamada kor u qaadidda caafimaadka ayaa lagu qabtay bulshada dhexdeeda, IDP-yada iyo isbitaalada kuwaas oo gaaray **1,561,160** qof dhammaan gobollada Soomaliya.
- **107,989** oo ah kulamada kor u qaadista caafimaadka ayaa loo qabtay xaafadaha iyada oo la gaaray **728,458** qof dhammaan gobollada.
- **1,176** oo ah xaalado looga shakiyay COVID-19 ayaa lagu aqoonsaday bulshada dhexdeeda waxaana loo gudbiyay xarumaha caafimaadka iyo isbitaallada si loogu sameeyo baaris iyo daweyn dheeri ah.
- Meelaha kala saaridda iyo hubinta oo buukanada lagu baaro ayaa laga sameey **30** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah, halka shaqaalaha SRCS iyo mutadawiciinta loogu tababaray in ay taageeraan barnaamijka dabagalka iyo la socodka bulshada.

*kormeerka:*

- Isugeyn **271** ka faa'iideystayaasha Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah (PHC) ee adeegyada SRCS-ta ayaa la qiimeeyay si loo xaqiijiyo dhaqangalinta isbitaal u gudbinta iyada oo **132** ka mid ah la xaqiijiyay u gudbinta isbitaalka iyo bixinta qarashka gaadiidka.
- Qiimeyn lagu sameeyay **07** rugaha caafimaadka guur guura iyo **03** rugaha caafimaadka aan guur guurin oo ku yaalla Bartamaha Koofurta Soomaaliya si loo ogaado hab shaqeyntooda, howsha ay hayaan, tayada iyo ku habboonaanta rugaha guur guura, iyo sida ay howsha u wadaan sadexda xarumood oo aan guur guurin kuwaas oo aysan ICRC-du si toos ah u kormeerin. Xarumaha caafimaadka ee guur guura ayaa booqasho ku tagay Baardheere (2 MHTs), Ceelwaaq, Dhuusamareeb, Ceelbuur, Afgooye iyo Mandheera halka xarumaha aan guur guurin ay ku yaallaan Bardaale, Qansaxdheere, iyo Baydhabo iyo Jalalaqsi oo ka tirsan gobolka Hiiraan.

## FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH, NADAAFADDA IYO ADEEGYADA KAABEYAASHA CAAFIMAADKA/XABSIGA

- **376,547** qof ayaa ka faa'iideystaY **72** nidaamyada biyaha ah oo bixinaya biyo nadiif ah.
- **135,093** ka faa'iideystayaal ah ayaa fursad deg-deg ah u helay biyo nadiif ah oo la cabi karo **34** tuulooyin ka tirsan Beled Xaawo, Beledweyne iyo Guri Ceel oo ay la jirto kor u qaadista nadaafadda.
- Isbitaalka Kismaayo (**400** sariirood) waxaa la dhammeeyay shaqada dayactirka qeybta jadeecada oo ka kooban **40** sariirood iyo nidaamka lagu meeleeyo biyaha wasaqda ah.
- Isbitaalka Keysaneey (**110** sariirood), waxaa la gtabagabeeyay howlihii dayactirka goobta qashinka iyo dayactirka hal qeyb oo ka mid ah qeybaha qaliinka iyo sidoo kale dayactirka qeybta dhaqan celinta jirka.



- Isbitaalka Madiina (**200** sariirood), axaa la gtabagabeeyay howlihii dayactirka goobta qashinka.
- Isbitaalka Baydhabo (**87** sariirood) dayactirka qeybaha qaliinka, tiyaatarka qaliinka, jikada iyo qolka raajada ayaa la dhmmeeyay.
- Howlo wax lagu dayac tirayo si loogu fududeeyo kooxda isbitaallada Keysaneey iyo Kismaayo in ay dayac tiraan qalabka muhiimka ah, sida: matoorka, mashiinka bullaacadaha nadiifiya, hagaajinta nidaamka tamarta ayaa la dhaqan galiyay.
- **1** mashruuc oo loogu talogalay dayactirka jiko iyo foornada rootiga ayaa laga hirgaliyay xabsiga Mandhera prison oo loogu talogalay **780** maxaabiis ah.
- **2** xarumood oo bixiya daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo ku yaala Cadaado iyo Xabash Waale oo sameeya **105** baaritaano ah maalintii ayaa gabi ahaanba dib loo dhisay loona hagaajiyay.
- **22** Farsamayaqaan oo ka tirsan Hey'adda Horumarinta Biyaha Puntland (PWDA) ayaa la tababaray iyada oo la siiyay qalab dhameystiran oo ay ku jiraan qalab koronto.
- **3** ka mid ah shaqaalaha Hey'adda Horumarinta Biyaha Puntland ayaa Machadka biyaha ee Kenya (KEWI) waxa uu ku tababaray sida loo taxliiliyo tayada biyaha dhulka. (KEWI)
- **22** oo ah farsamoyaqaanada ceelasha oo ka socda Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta ee Galmudug ayaa la tababaray iyada oo la siiyay qalab dhammeystiran.

**KA JAWAABIDDA COVID-19**

- **165** mutadawiciin SRCS ka tirsan ayaa bixiyay farriimo lagu hormarinayo nadaafadda, farriimo looga hortagayo Covid-19, iyaga oo sidoo kalena ugu deeqay saabuun iyo koloriin in ka badan **511,182** dadka deegaanka ah iyo barakacayaasha ku nool Dhoobleey, Beled Xaawo, Baydhabo, Afgooye, Beledweyn, Marka, Jowhar, Buurfuule, Kismaayo, Cadale iyo Balcad.
- **3,183** maxbuus oo ku jira **10** xabsi oo ku yaalla daafaha Soomaaliya iyo Soomaaliland ayaa la siiyay saabuun iyo agab nadaafadeed oo ay la socoto kor u qaadista nadaafadda iyo ka hortagga caabuqa Covid-19. Guddiyada nadaafadda maxaabiista ayaa sidoo kale dib loo howlgaliyay.

## BIXINTA KAALMADA DARYEELKA DEG-DEGGA AH, SOO CELINTA HAB-NOLOLEEDKA IYO DHISIDDA AWOODDA ADKEYSIGA



- **411,985** qof ayaa helay deeqo lacageed oo ujeedo badan intii lagu jiray xaaladaha deg-degga ah.
- **40,948** oo ah caruurta ka yar 5-ta sano sano ka yar iyo **11,302** dumar uur leh ama nuujinaya ayaa ka qeyb galay barnaamijka quudinta dheeriga ah waxaana la siiyay dawooyinka kala ah (plumpy sup and CSB plus) sida ay u kala horreeyaan.
- **17,040** qof ayaa lagu caawiyay deeqaha soo kabashada beeraha.
- **3,906** qof ayaa lagu caawiyay lacago iyada sidoo kale la siiyay qalab ay ku shaqeystaan.
- **303,126** qof ayaa la siiyay oo ka faa'iideystay jawaanada ciidda si ay uga hortagaan daadadka.
- **6,726** qof ayaa la siiyay waxyaabaha la beero iyo tababarro ku saabsan abuurka aasaasiga ah iyo soosaarka calafka
- **150** oo ah shaqaalaha caafimaadka xoolaha bulshada iyo **30** farmashiisteyaal gaar ah oo dhanka xoolaha ah ayaa ka faa'iideystay tababar iyo xirrmooyinka caafimaadka xoolaha.
- **2,519** oo ah qoysas ay dumar hogaamiyaan ayaa lagu caawiyay **2** wareeg oo deeg lacageed ah oo loogu talogalay ganacsiyada yar yar.
- **240** qoysas ayaa lagu caawiyay agabka shinida lagu dhaqdo iyo tababar.
- **236** qoysas ayaa lagu caawiyay agabka kaluumeysiga iyo tababar.
- **1,415** maxaabiis iyo ilaaliyeyaal ah ayaa la siiyay qoondo cunto oo Ramadaanka loogu talo galay xabsiyada Hargeysa iyo Mandheera.
- **1,139** maxbuus oo ku jira xabsiyada Hargeysa iyo Mandheera ayaa lagu caawiyay marooyin kaneeco.

*Kormeerka:*

- Isugeyn **93,373** ka faa'iideysteyaal ah ayaa loo diwaan galaiyay barnaamijyada kaalmada iyo hab-nololeedka oo ay ku jiraan dad la siiyay kaalmo kaash ah oo la xaqiijiyay.

## ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH

- Kaalmo lacageed ayaa la gaarsiiyay **100** ka faa'iideysteyaal ah si loogu caawiyo in ay ka soo kabtaan dhibaatooyin gaar ah oo ka dhashay colaadaha ama rabshdaha.
- **2** mashruuc oo dhanka ilaalinta ah oo ay bulshadu saldhig u tahay ayaa laga bilaabay gobollada Gedo iyo Bakool si loogu caawiyo wax ka qabashada dhibaatoyinka dhanka ilaalinta ah.
- Farriimo kor loogu qaadayo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka iyo ilaalinta daryeelka caafimaadka ayaa laga siidaayay raadiye magaalada Kismaayo.

## CAAWINTA IN LA HAGAAJIYO XAALDAHA NOLOLEED IYO SIDA LOO LA DHAQMO MAXAABIISTA

- ICRC-du waxa ay booqataY **5** goobood oo maxaabiis lagu hayo oo ay ku jiraan **1,736** maxaabiis ah si loo qiimeeyo xaaladooda nololeed iyo sida loola dhaqmo. **56** ka mid ah maxaabiista ayaa si gaar gaar ah loola socday loona booqday.
- **1,200** marooyin kaneeco ah ayaa loogu deeqay **4** xabsi maxaabiista ugu baahida badan. **600** buste iyo **600** joodariyaal ayaa sidoo kale loogu deeqay **2** xabsi.
- Maxabiisku jira **2** xabsi ayaa intii lagu jiray bisha barakeysan ee Ramadan helay deeq isugu jirta ari, misir, saliid, caleen shaah, caano iyo sokor.
- Deeq ka kooban agabka isboortiga ayaa la gaarsiiyay **2** xabsi.
- Deeq dawo ah ayaa la gaarsiiyay **3** xabsi oo ka faa'iideysteen **2,400** oo maxaabiis ah.

### KA JAWAABIDDA COVID-19

- Maxaabiis iyo shaqaalaha xabsiga oo **10** xabsi ka kala socday ayaa helay agabka nadaafadda iyo Qalabka Ilaalinta shaqsiyadeed (PPE) si cudurka looga hortago.
- **5,610** oo ah af-xirka dib-loo isticmaali karo ayaa la siiyay maxaabiista ku jira xabsiyada, iyo **4,475** oo ah af-xirka halka mar la isticmaali karoo o la siiyay mas'uuliyiinta xabsiyada.
- **5** talooyin qoraal ah si loogu caawiyo yareynta faafitaanka cudurka Covid-19 ayaa lala wadaagay mas'uuliyiinta.

## SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

- Iyada oo la kaashanayo SRCS, **128, 530** oo ah Farriimaha laanqeyrta Cas ayaa la is dhaafsaday, **163, 371** wadahadal taleefoon oo bilaash ah ayaa la siiyay qoysaska kal maqan iyo **395** dad la la'aay ah oo la helay.
- **10** wicitaano nooca muuqaalka ah ayaa la fududeeyay oo dhexmaray qoysas Soomaaliya jooga iyo **3** maxbuus oo dibadda ku xiran.
- 5-ta xabsi ee la booqday, **38** farriimaha aqbaarta qoyska ah oo loogu gudbiyay qoysaska maxaabiista taleefoo, **4** farriimaha Laanqeyrta Cas ah ayaa la is dhaafsaday, iyo **13** ogeysiisyo ah ayaa loo sameeyay muwaadiniinta ajnabiga ah wakiiladooda diblomaasiyadeed ama UNHCR.

## HUBINTA XISAAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

### XARUNTA XIRIIRKA BULSHADA (373):

- Isugeyn **6,866** farriimo ah ayaa la helay lagan shaqeeyay iyada oo loo marayo nambarka bilaashka ah ee (373) meelo badan.
- **57%** (**3,931**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay barnaamijka sugnaanta dhaqaalaha oo laga helay Gedo (**1,269**), Jubada Hoose (**486**), Baay (**436**) iyo Mudug (**323**).
- **43%** (**2,933**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay barnaamijka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah waxaana laga helay Shabeelada Dhexe (**522**), Gedo (**403**) iyo Bakool (**384**).



**KA JAWAABIDDA COVID-19**

- **6,866** qof ayaa la siiyay macluumaad ku saabsan ka hortagga Covid-19 iyada oo loo marayo Xarunta Xiriirka Bulshada (373).
- Dabagalka dadka ayaa lagu sameeyay xarunta wicitaanka bulshada ICRC. **2,811** xiriir oo lala xiriirinayo **1,588** kiisas laga shakisanyahay ayaa lagu dabagalay Baydhabo, Kismaayo, Baardheere, Ceelwaaq, Balcad, Beledweyne, Gubadleey, Deyniile iyo **13** meelo kale ah.

## KOR U QAADISTA MABAADII'DA BANIAADAMNIMADA IYO IHL

- In ka badan **8,800** oo ah hogaamiyeyaasha bulshada, haweenka, dhalinyarada, ka faa'iideystayaasha iyo mutadawiciin ka tirsan SRCS ayaa lagu wacyi galiyay mabaadii'da aasaasiga ah laguna wargaliyay howlaha iyo barnaamijyada ICRC iyo SRCS.
- **425** oo ah xubno ka tirsan ciidamada qalabka sida, kuwa amniga iyo booliska ayaa la baray sharciga caalmiga ah iyo mabaadii'da baniaadamnimada.

ICRC waxa ay caawisaa dadka oo dhan oo ay saameeyeen colaadaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha, iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda, ugana yareyso dhibaatadooda, iyada oo kaashashaneysa saaxiibada Laanqeyrta cas iyo Bisha Cas. Ururku waxa uu kaloo doonayaa in uu ka hortago dhibaatada isaga oo dhiirrigalinaya oo xoojinaya sharciga bani'aadamnimada iyo iyaga ooh hor kacaya mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

**ICRC Somalia Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

ICRC offices in Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar, Guricel and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, Feberaayo 2022

ICRC

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
https://www.instagram.com/icrc_somalia/
blogs.icrc.org/Somalia

Reference Number